


# Warbixinta Kaqeyb galinta Bulshada oo kooban Horumarinta ku jihaysan gaadiidka ee aagga Kent / Des Moines



## Hordhac

Sound Transit waxa ay iibsatay qiyaastii afar hektar oo dhul ah oo ku yaala agagaarka Midway ee Kent iyo Des Moines si ay u kaydsato qalabka dhismaha iyo xafiisyada wareega ee loo isticmaalo in lagu dhiso tareenka fudud ee mustaqbalka lagu xidhiidhinayo Federal Way iyo saldhiga tareen ama boosteejada cusub ee Kent/Des Moines. Inta badan hantidaas, oo ku taal meel u dhow isgoysyada State Route 99 iyo Wadada Kent-Des Moines, waxay diyaar u noqon doontaa dib-u-horumarin marka dhismuhu dhammaado. Ku daridda adeegya cusub sida guriyeynta, tafaariiqda, iyo hawlaha kale ee bulshada ku jihaysan waxay abuuri karaan fursado cusub waxayna gacan ka geysan karaan dhex galka saldhiga cusub ee bulshada deegaanka. Iyada oo lala kaashanayo Magaalada Kent, Sound Transit ayaa hogaminaya habka lagu xaqiijinayo hawlahan cusub taas oo qaayb ka ah barnaamijkayaga horumarinta ku jihaysan transit-oriented (TOD).



Si aan u ogeysiino shaqadeena si aan isula eegno yoolalka horumarinta ee goobtan, waxaan la kulannay daneeyayaasha waxaanan gaarnay dadweynaha guud si aan u fahano waxyaalahu mudnaanta u leh bulshada.

## Natijooinga Muhiimka ah(ama Waxyaabaha la ogaaday)

Qeybtani waxay kusiineysa jawaab cenlintii aan aruuriney inta lagu gudajiray Dhamaan hanaanka kaqeybgalinta

**Waxay sii neysaa fursado cusub oo guryeyn ah oo ay ku jiraan unugyo la awoodi karo oo kala duwan oo loogu talagalay tirada qoysaska kaladuwani.**

- In la arko guryo la awoodi karo waa rabitaanka qeyb kamid ah mashruucan.
- Rabitaanka in la arko guryo qoysas oo tirade qoyska qaada si loo daboolo bahiida bulshada maxaliga.
- Daneynta fursadaha lahaanshaha guri

**Waxaa kamid ah adeegyada ganacsiyo yar yar oo tafaariiq ah oo dhinac socdo guryeynta cusub.**

- Rabitaanka taageerada, iyo bixinta boosas ganacsiyada maxalliga ah, kuwa yaryar iyo kuwa soo koraya
- Daneynta in martigalinta ganacsiyada la xiriira cuntada, sida wax soo saarka cuntada iyo kafateeriyyada/makhaayadaha

## Hanaanka ka qeyb galinta

- **Ka qeyb galka hore:** Kulamo lala yeesho wakaaladaha maxalliga ah iyo kuwa gobolka, siyaasad-dejiyeasha, ururada bulshada, iyo daneeyayaasha kale si looga wada hadlo mashruuca iyo baahiyaha iyo yoolalka mashruuca.
- **Wajiga 1aad:** Sahan Khadka intarnet-ka ah oo toos ah oo diiradda lagu saarayo mudnaanta horumarinta goobta, sida guryeynta, ganacsiyada, adeegyada, astaamaha bulshada, iyo meelaha caamka ah.
- **Wajiga 2aad:** Shir furan oo khadka intarnet-ka ah, sahan iyo shir toos ah oo lagu tifactiraayo fikradaha mashruuca.
- **Wajiga 3aad:** Diwaangalinta natijada muhiim ee kasoo baxday hanaanka ka qeyb galka isla marka lagu qeexo tilaabada xigta ee mashruuca.

## Abuur qiimo bulsho

- Rabitaanka adeegyo isku dhaf ah isla markaana taageero bulashada kala duwan ee maxaliga.
- Daneynta in la helo goobo ay bulshadu ku kulanto iyo goobo shirar.
- Fursadaha adeegyada suurtagalika ah ee sida daryeelka carruurta, rugta caafimaadka, iyo adeegyada taageeradaa ee sida shaqada, caafimaadka dhimirka, iyo la-talinta qoyska.

## Ka tarjumaya kala duwanaanshaha bulshada deegaanka

- Rabitaanka in mashruucani laga helo adeegyo isku dhaf ah si loo daboolo baahiyaha bulshada deegaanka
- Rabitaanka in ladaboolo baahiyada dhamaan qeybaha dadka oo ay kujirtaan dadka naafada leh.
- Rabitaanka in la arko kaladuwaansha daddeed( jinsiyadeed) iyo dhaqan ee lagu xusay sooj eedintii horumarinta aaggan.

## Naqshadeynta goobta waa in ay xoojisaa xasilloonida korna u qaada amniga dadweynaha

- In lahabeeyo "Wadnaha" goobtu iyo agaagaarka fagaaraha dadweynata loona yeelo barnamijyo iyo meelo ka horeeyo dukaamaha tafaariiqda.
- Wax ka qabashada welwelka amniga dadweynaha ee habka naqshadeynta
- Fududeynta isku xirka dadka lugeynaya iyo baaskiillada ee inta udhaxeeysa mashruuca, saldhigga tareenka fudud, SR99, iyo xaafadaha ku xeeran.
- Wuxuu bixinayaa dhismayaal kala duwan, goobo dadweyne, iyo goobo cagaaran si loo abuuro xiiso.

## Tilaabooyinka xiga

Jawaab-celinta bulshada ee lagu soo ururiyay dadaalkan ka-qayb galka ayaa loo isticmaali doonaa habka tartanka ee Sound Transit si loo doorto la-hawlgalayaal mashruuc. Shuruudaha kale, waxaan tixgelin doonaa sida wanaagsan ee la-hawlgalayaasha mustaqbalka u muujinayaan baahiyaha iyo aragtida lagu muujiyay dadaalka ka-qaybgalka.

Si aad ula socoto mashruuca, booqo website-kayaga mashruuca:

<https://www.soundtransit.org/system-expansion/creating-vibrant-stations/transit-oriented-development/kent-des-moines>